



NCCN  
GUIDELINES  
FOR PATIENTS®

2021

# Baaritaanka Kansarka Mandhacirka

Lagu soo bandhigay taageerada ka timid:



NATIONAL COMPREHENSIVE CANCER NETWORK®  
**FOUNDATION**  
Guiding Treatment. Changing Lives.

**FIGHT**  
★  
COLORECTAL CANCER



Waxaa laga helayaa onleenka [NCCN.org/patients](https://www.nccn.org/patients)



## Way fududahay in lagu lumo dunida kansarka



## Ha noqoto NCCN Guidelines ee Bukaanada<sup>®</sup> hagahaaga

- ✓ Hagaha tallaabo tallaabada ee dooqyada daryeelka kansarka ee u badan inay yeeshaan natiijada ugu wanaagsan
- ✓ Sida ku saleysan tilmaamaha daaweynta ee ay adeegsadaan bixiyayaasha daryeelka caafimaadka caalamka oo dhan
  - ✓ Loogu tallogalay inay kaa caawiso inaad kala hadashid daaweynta kansarka dhaqtarkaaga



## NCCN Guidelines for Patients® waxaa sameeyay National Comprehensive Cancer Network® (NCCN®)



### NCCN

- ✓ Isbahaysiga xarumaha kansarka hormuudka ka ah Mareykanka oo dhan waxaa ka go'an daryeelka bukaanka, cilmi baarista, iyo waxbarashada

Xarumaha kansarka oo ka qeyb ah NCCN:  
[NCCN.org/cancercenters](https://www.nccn.org/cancercenters)



### NCCN Clinical Practice Guidelines in Oncology (NCCN Guidelines®)

- ✓ Waxaa sameeyaydhaqaatiirta xarumaha kansarka NCCN iyada oo la adeegsanayo cilmi baarista ugu dambeyso iyo sannooyin waaya aragnimo ah
- ✓ Bixiyayaasha daryeelka kansarka ee caalamka oo dhan
- ✓ Tallooyinka taqasuska ee loogu tallogalay baaritaanka kansarka, cudurka, iyo daaweynta

Onleenka bilaashka ah ee  
[NCCN.org/guidelines](https://www.nccn.org/guidelines)



### NCCN Guidelines for Patients

- ✓ U soo bandhig warbixinta NCCN Guidelines qaab sahlan in la barto
- ✓ Dadka kansarka qabo iyo kuwa iyaga taageero
- ✓ Sharax dooqyada daryeelka kansarka u badantahay inaad yeelatid natiijada ugu wanaagsan

Onleenka bilaashka ah ee  
[NCCN.org/patientguidelines](https://www.nccn.org/patientguidelines)

**NCCN Guidelines ee Bukaanada waxay ku saleysantahay NCCN Guidelines® oo Baaritaanka Kansarka Mandhaciirka, Nooca 2.2021 – Abriil 13, 2021.**

© 2021 National Comprehensive Cancer Network, Inc. Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsan yihiin. NCCN Guidelines ee Bukaanada iyo sawirada halkaan laga yaabo in dib loogu soo saaro qaab walba oo ujeed walba iyada oo aan jirin ogolaansho qoraal ah oo muuqdo ee NCCN. Ma jiro qof, oo ay ku jiraan dhaqaatiirta ama bukaanada, oo u adeegsan karo NCCN Guidelines ee Bukaanada ujeed walboo ganacsi ah iyo ma sheegan karaan, ma matali karaan, ama soo jeedin karaan in NCCN Guidelines ee Bukaanada lagu badelo qaab walba ee laga soo saaray, sida ku saleysan, la xiriirto, ama ka soo baxaan NCCN Guidelines ee Bukaanada. NCCN Guidelines waa shaqo socoto ee laga yaabo in dib loo qeexo inta badan marka la helo xog cusub oo muhiim ah. NCCN madamaanad qaado nooc walba oo wax walba ee la xiriirto tusmadeeda, isticmaal, ama codsiga ama afeefka masuuliyad walba oo codsigooda ama isticmaalka qaab walba ah.

NCCN Foundation waxay raadineysaa taageerida malaayiinta bukaanada iyo qoysaskooda ay saameysay baaritaanka kansarka oo maalgelinta iyo qeybinta NCCN Guidelines ee Bukaanada. NCCN Foundation ayay sidoo kale ka go'antahay hormarinta daaweynta kansarka iyaga oo maalgelinayo dhaqaatiirta mustaqbalka qaranka ee xarunta hal abuurka ee cilmi baarista kansarka. Wixii sharaxaado dheeraad ah iyo maktabada buuxdo ee bukaanka iyo illaha daryeelayaasha, booqo [NCCN.org/patients](https://www.nccn.org/patients).

Shabakada Kansarka Dhameystiran ee Qaranka (NCCN) / NCCN Foundation  
3025 Chemical Road, Suite 100  
Plymouth Meeting, PA 19462  
215.690.0300



## NCCN Guidelines ee Bukaanaada waxaa lagu taageeraa maalgelinta NCCN Foundation®

Si loo sameeyo hadiyad ama wax badan looga barto, fadlan booqo [NCCNFoundation.org/donate](https://www.nccn.org/donate) ama i-meelka [PatientGuidelines@NCCN.org](mailto:PatientGuidelines@NCCN.org).



### Sidoo kale waxaa taageero La dagaalanka Kansarka Mandhaciirka

Waxaan ula dagaalanaa si aan u daaweyno kansarka mandhaciirka oo ugu adeegno sida horyaalada rajada oo joogto ah oo dhammaan dadka uu saameeyay cudurkaan iyada oo la adeegsanayo taageerada bukaanka la ogeysiiyay, badelka xeerka saameynta leh, iyo dadaalada cilmi baarista hormarsan. Sida urur ka go'antahay inuu ku caawiyo bulshada inay helaan illo la aaminsanyahay oo lagu sameeyo go'aano la ogeysiiyay ee ku saabsan caafimaadkooda, waan ku faanaa inaan taageerno illahaan dhameystiran. [Fightcolorectal.org](https://www.fightcolorectal.org)

### Iyo taageerada deeqsinimo ee:

Kristina Gregory  
Lois & Donald Howland  
John Kisiel  
Wui-Jin Koh  
Elizabeth & Brian Rizor  
Marianne & Gary Weyhmuller



# Mawduucyada

- 6 Baaritaanka kansarka waxay badbaadisaa nolol
- 14 Isku celceliska halista ee kansarka mandhaciirka
- 20 Taariiqda caafimaadka qoyska
- 26 Burooyinka mandhaciirka iyo kansarka
- 33 Xanuunka ololka caloosha
- 39 Khayraadka
- 40 Kaalmaha ay tahay in la barto
- 43 Cida Kaalmada Ka Gaystay NCCN
- 44 Xarunta Kaansarka NCCN
- 46 Tusmo

# 1

## Baaritaanka kansarka waxay badbaadisaa nolol

- 
- 7 Waa maxay kansarka mandhaciirka?
- 
- 9 Maxaa la isu baaraa?
- 
- 10 Yaa ah inuu baaritaan helo?
- 
- 12 Maxaa badbaadiyo nolosha marka laga tago baaritaanka?
- 
- 13 Qodobada muhiimka ah





Kansarka mandhaciirka waa kansarka sadexaad ee ugu caadisan caalamka. Baaritaanka wuxuu ka hortagi karaa kansarka mandhaciirka oo la ogaado xili hore markii daawada aad ugu badantahay.

## Waa maxay kansarka mandhaciirka?

Jirka aadanaha wuxuu ka sameysanyahay in ka badan 30 tiriliyan oo unugyo ah. Kansarka waa cudur unugyo aan caadi aheyn oo ku kobcaa xakameyn la'aan. Kansarka mandhaciirka waxaa loola jeedaa kansarka mandhaciirka ama malawadka.

### **Mandhaciirka iyo malawadka waa xubno ku jiro nidaamka dheefshiidka**

Nidaamka dheefshiidka wuxuu burburiyaa cuntada si jirka u isticmaalo. Caloosha dhexdeeda, cuntada

waxaa loo burburiyaa gabalo yaryar. Mandhaciirka yar, ku dhawaad nafaqooyinka oo dhan ee cuntada waxay galaan qulqulka dhiiga.

Nidaamka dheefshiidka ayaa sidoo kale ka saaro cuntada aan shiidmin ee jirka. Mandhaciirka weyn, biyaha iyo cusbada wuu ka saaraa cuntada aan shiidmin sida ay maraan dhinaca mandhaciirka. Cuntada adag waxaa loo yaqaan saxaro ama xaar. Malawadka ayaa celiyo saxarada illaa ay ka soo baxdo jirka afka loo yaqaan futada.

### **Qaar ka mid ah hormarka burada kansarka mandhaciirka**

Darbiga mandhaciirka wuxuu ka sameysanyahay fadhiyo unug ah. Fadhiga hoose ee taabto saxarada waxaa loo yaqaan xababka. Aagaga kobaca unug aan caadiga aheyn, loo yaqaan buro, in badan waxay ku dhacdaa xabka.

### **Mandhaciirka iyo malawadka**

Mandhaciirka iyo malawadka waxay ka qeyb yihiin mandhaciirka weyn. Mandhaciirka waa qeybta ugu dheer—qiyaastii 5 fiit (1½ miitir) dhirir. Wuxuu leeyahay afar qeybood: mandhaciirka qeybta guud, dhexe, hoose, iyo malawadka. Futada waxay u dhowdahay dhammaadka mandhaciirka balaaran. Waxay ku saabsantahay 5 inji (12 sentimiitir) dhirir.



Inkasta oo burooyinka ugu badan ayna noqoan kansarka, ku dhawaad dhammaan kansarada mandhaciirka waxay u bilowdaan sida burooyin. Waxaa jiro noocyo kala duwan ee burooyinka, iyo qaarkood waxay aad ugu dhowyihiin si ay kansar u noqdaan kansar badelkii kuwa kale. Waxay qaadataa sannooyin badan oo burada ku noqoto kansar.

### Unugyada kansarka waxay leeyihiin kobac aan la xakameyn

Markii unugyada kansar noqdaan, iskama dhigaan sida unugyo caadi ah. Waxay jabiyaan sharciyada kobaca unuga caadiga ah.

- Si ka duwan unugyo caadi ah, unugyada kansarka ma dhintaan markii ay aheyd. Waxay sidoo kale sameeyaan unugyada kansar badan oo cusub oo badelaa unugyada caadiga ah waqti kadib.

- Unugyada kansarka meel ma joogaan. Waxay ku kori karaan dhinaca darbiga mandhaciirka iyo u dhow xubnaha iyo unugyada.
- Unugyada kansarka wuxuu ku faafi karaa qeybaha kale ee jirka. Xididada dhiiga iyo qanjirka waxay ku jiraan gudaha darbiga mandhaciirka. Markii unugyada kansarka ay gaareen xididadaan, way faafi karaan.

Nidaamka diyaarinta waa qaab caadi ah ee kooxeynta kansarada oo kobacooda iyo faafida. Heerarka kansarka mandhaciirka wuu ka duwanyahay heerka 0 illaa heerka 4. Markasta oo ay sarayso kobaca iyo faafida kaansarku, waxaa sareeya heerka uu taagan yahay.

Inta oo kansarka korayo, wuxuu sababi kara aastaamo. Markii ay jiraan aastaamo, kansarka ayaa caadi ahaan faafa oo ay adag tahay in la daaweeyo. Haddii daaweynta aysan shaqeynin,

### Mandhaciirka iyo burooyinka futada

**Burooyinka waa nabro ka soo baxaa darbiga mandhaciirka. Waxay leeyihiin qaabab badan. Burooyinka kacsan ee u eeg sida mashruumka waxaa loo yaqaan burooyinka kansarka (bidix). Burooyinka simman waxay ku leeyihiin wareeg kore iyo boos balacsan (midigta).**



unugyada kansarka way sii korayaan oo waxay ku sababaan xubnaha inay joojiyaan shaqada.

## Maxaa la isu baaraa?

Baaritaanka kansarka mandhaciirka wuxuu raadiyaa burooyin iyo kansar ka hor inta aysan aastaamaha bilaaban. Waxay ku badbaadisaa nolol labo qaabood:

- **Baaritaanka wuxuu ka hortagaa kansarka mandhaciirka.** Kansarka waa laga hortagi karaa markii burooyinka laga saaro ka hor inta aysan noqon kansar.
- **Baaritaanka wuxuu ogaadaa kansarka xili hore aastaamaha intaysan bilaaban ka hor.** Markii kansarka la ogaado xili hore, way sahlantahay in la daaweeyo ama la dabiibo.

Baaritaanka wuxuu bilowday markii qofka uu ku jiro halista kansarka mandhaciirka. Waxaa jiro dhawr qaabood oo baaritaan ah:

- **Sheybaarka caloosha** wuxuu ku lugleeyahay qalab gacanta lagu qabto ee u ogolaado dhaqaatiirta, sida dhaqaatiirta caloosha, inay ka eegaan gudaha mandhaciirka iyo malawadka burooyinka aan caadi aheyn.
- **Raajada** waxay sameysaa sawirada gudaha mandhaciirka iyo malawadka. Dhaqtarka raajada ayaa dib u eegayo sawirada burooyinka aan caadiga aheyn.
- **Baaritaanada sheybaarka** wuxuu ogaadaa calaameeyayaasha kansarka, sida dhiiga, saxarada ku jiro.

Qaabka baaritaanka kaliya ee saari karo burooyinka waa sheybaarka caloosha. Nidaamyada sheybaarka caloosha ee baaritaanka kansarka mandhaciirka waa sheybaara mandhaciirka iyo sheybaarka futada.

## Baaritaanka iyo cudurka

Baaritaanka kansarka waxaa la sameeyaa haddii aadan laheyn aastaamaha iyo calaamadaha kansarka mandhaciirka. Markii aad yeelatid aastaamo ama calaamado, ujeedka baaritaanka waa ogaanshaha dhibaataada iyo sameynta baaritaano. Weydii bixiyaha daryeelkaaga caafimaad wax ku saabsan helida baaritaanka kansarka mandhaciirka islamarkaasba haddii aad qabtid aastaamahaan ama calaamadahaan:

### Dhiig yaraanta birtu ku yar tahay



### Saxarada jirka



### Isbadelka caadooyinka saxarada



Burooyinka laga saaray waxaa loo dirayaa taqasuska loo yaqaan taqasuska cudurka. Dhaqtarkaan wuxuu ka eegayaa kansar burada isaga oo adeegsanayo weyneyso. Haddii unugyada kansarka la helo, baaritaanka kansarka ayaa la sameeyaa.

## Yaa ah inuu baaritaan helo?

Halisaha waa fursada dhacdo inay dhaceeyso. Halista waxay ka qeyb tahay nolosha. Waxaa jiro haliso markii aan cuneyno, safreyno, oo aan maalgelineyno lacag. Nolosha ayaa sidoo kale ku jirtaa halista dhibaatooyinka caafimaadka, oo ay ku jiraan kansarka.

### Dadka qaar waxay aad ugu badantahay inuu ku dhaco kansarka mandhaciirka badelkii dadka kale

Waxyaabaha kordhiyaa halista waxaa loo yaqaan xaqiiqaha halista. Tusaale ahaan, halista inuu kugu dhaco qabow waa xiriir dhow ee qofka qaba.

Waxaa jiro xaqiiqaha halis badan ee kansarka mandhaciirka. Qaarkood waa la badeli karaa, sida:

- Cunista cuntada sida sareyso loo warshadeeyay
- Sigaar cabida
- Bilaa jimicsi

Xaqiiqaha halista kale lama badeli karo, sida:

- Da'daada
- Taariiqdaada caafimaadka

Haddii aad leedahay xaqiiqaha halista, micnaheeda ma ahan inaad hubtid inaad qaadid kansarka mandhaciirka. Si lamid ah, waad qaadi kartaa kansarka mandhaciirka xittaa haddii aadan qabin xaqiiqo la garanayo.

## Hagaha 1. Heerarka halista ee kansarka mandhaciirka

<b>Isku celceliska halista</b>	Waxaa tahay ugu yaraan 45 sanno jir oo ma lihid xaqiiqaha halis kale
<b>Halista korodhay</b>	Qoyskaaga oo dhalasho ahaan wuxuu leeyahay taariiq kansarka mandhaciirka ama burooyinka kansarka hore ee hormarsan
	Aad yeelatay kansarka mandhaciirka ama burooyinka kordhiyaa halista kansarka
<b>Halista sareyso</b>	Waxaad leedahay midkood mid ka mid ah cuduradaan bararka saxarada: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Cudurka saxarada raaga</li> <li>• Cudurka marinka dheefshiidka</li> </ul>
	Aad leedahay mid ka mid ah cudurka kansarkaan dhaxalka ah: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Cudurka la iska dhaxlo</li> <li>• Cudurka burooyinka, sida burooyinka qadiimiga ah iyo burooyinka aan kansarka aheyn</li> </ul>

## Xaqiiqaha halista qaar waxay saameysaa waqtiga baaritaanka kansarka

Ma ahan in dhammaan xaqiiqaha halista ay leeyihiin isla saameynta. **Fiiri Tilmaanta 1** heerarka halista ee la adeegsaday in lagu xiro baaritaanka kansarka mandhaciirka oo qof walba.

Baro waxa halistaada kansarka mandhaciirka waa ka hor da'da 40, marka inaadan bilaabin qeylada mardambe. Si dhaqso ah u baro halistaada haddii goyskaaga uu qabay kansarka mandhaciirka.

Waqtiga la bilaabayo baaritaanka kansarka mandhaciirka oo dib loo baaro waxaa looga hadlaa sadarada xiggo.

- Sadarka 2 wuxuu daboolaa baaritaanka dadka leh halista dhexe.
- Sadarka 3 wuxuu ka hadlaa baaritaanka markii ay jirto taariqda goyska ee kansarka mandhaciirka ama burooyinka kansarka hore. Waxay sidoo kale si kooban uga hadashaa cudurka dhaxalka kansarka.
- Sadarka 4 wuxuu sharaxaa dib u baarista haddii aad laheyd burooyinka kansarka hore ama kansarka mandhaciirka.
- Sadarka 5 wuxuu sharaxayaa nidaamka baaritaanka nidaamka haddii aad qabtid cudurka bararka saxarada.



Baaritaanka kansarka mandhaciirka AAD ayuu muhiim u yahay! Kansarka mandhaciirka waa mid ka mid ah dhoor kansaro oo aanan kaliya si sareyso loo daaweyn karin markii la ogaado xili hore, laakin wuxuu dhabtii ka hortagi karaa baaritaanka joogtada ah! Iyada oo diyaarinta sheybaarka mandhaciirka, ama nidaamka ku qaadista muunada ee tijaabada baaritaanka guriga ayaa u muuqan kara mid aadan rabin, waxaan kuu balanqaadi karaa, sida badbaadada kansarka mandhaciirka heer III, aad ayaa looga hortagi karaa daaweynada kansarka mandhaciirka sida shucaac iyo daaweynta kiimikada!

– Ben

## Maxaa badbaadiyo nolosha marka laga tago baaritaanka?

Baaritaanka wuxuu muhiim u yahay ka hortaga kansarka mandhaciirka. Waxaa jiro 7 tallaabooyin kale ee aad qaadi kartid si aad uga hortagtid kansarka mandhaciirka:

### 1. Qaado aspirin

Qaadashada aspirin-ka maalin walba oo ugu yaraan 5 illaa 10 sanno wuxuu kaa illaaliyaa inuu kugu dhaco kansarka mandhaciirka. Weydii bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka haddii aspirin kugu haboonyahay. Dhiig baxa gudaha waa halista qaadashada aspirin.

### 2. Cun cuntooyin caafimaadan

- Cun cuntooyin badan oo dhir ku saleysan.
- Cun cadad xadidan oo hilibka cas ah oo ka fogow hilibka la warshadeeyay.
- Xadid cunista cuntooyinka la warshadeeyay iyo warshadeynta qasaceysan.
- Haku tiirsanaan dheeraadka cuntada kaliya nafaqooyinka. Hel nafaqooyinka cuntada dabiiciga.

### 3. Cab khamri yar ama ha cabinba

Cabista sare iyo dhexaad ee khamrida ayaa kordhin karto halista kansarka mandhaciirka. Cadadka khamrida oo badqabka ah waxay ku xirantahay jidhka qofka. Halista kansarka mandhaciirka kuma korodho 1 cabitaan maalintiiba oo dumarka iyo 2 cabitaano maalintii oo ragga ah.

### 4. Dhaqaaq wax badan oo naso in yar badanaa

Howsha jirka oo joogtada ku saleysan waxay ku xirneyd halista hoose ee kansarka mandhaciirka.

### 5. Hel fitamiin D kugu fillan

Heerarka hoose ee fitamiinka D waxay kordhin kartaa halista kansarka mandhaciirka. Ka hortag heerarka hoose ee cunista cuntooyinka ee fitamiinka D. Fitamiin D waa salmoonka, tuunada, kaluunka cagaarka, iyo jaalaha ukunta. Sidoo kale waad cuni kartaa cuntooyinka fitamiin D-ee la xoojiyay oo qaado dheeraadyada.

Maqaarkaaga wuxuu sameyn karaa fitamiin D markii ay gaarto qoraxda. Kareemka qoraxda waa lagu talliyay markii ay banaanka ka yihiin waqti muddo la kordhiyay. Marsashada kareemka qoraxda waxay xadeyn kartaa cadadka fitamiin D ee uu maqaarka sameeyo.

### 6. Joogteey culeys caafimaadan

Cayilka xaqiiqda halis kale oo ah kansarka mandhaciirka. Tasmada miisaanka weyn (BMI) waa tallaabada dufanta jirka. BMI ee 18.5 illaa 24.9 waxaa loo tixgeliyay culeys caadi ah. Raadraaca culeyskaaga, cuntada, kaloorka, iyo heerarka howsha ayaa kugu caawin karo buuxinta yoolalkaaga.

### 7. Jooji sigaar cabista

Haddii aad sigaar cabtid, jooji! Weydii bixiyahaaga daryeelka caafimaadka wixiicaawinta ee lagu joojinayo. Waxaa jiro la talinta lagu joojinayo sigaar cabista. Daawada waxay kaa caawin kartaa joojinta rabitaan sare iyo ka laabashada aastaamaha.

## Qodobada muhiimka ah

- Kansarka mandhaciirka waxaa loola jeedaa kansarka mandhaciirka ama malawadka. Labadaan xubnaha waxay ka qeyb tahay nidaamka dheefshiidka. Waxay ka caawisaa ka saarida saxarada jirka.
- Burooyinka waa nabro ka baxo leenka gudaha ee mandhaciirka ama malawadka. Inkasta oo burooyinka ugu badan ayna noqdon kansarka, ku dhawaad dhammaan kansarada mandhaciirka waxay ku bilowdaan sida burooyin.
- Baaritaanka kansarka mandhaciirka wuxuu badbaadiyaa nolol. Waxay ka hortagtaa kansarka iyada oo la helayo oo laga saarayo burooyinka ka hor inta aysan noqon kansar. Waxaan kaloy arkaan kansarka xili hore markii daaweynta ay aad ugu badantahay.
- Halisaha waa fursada dhacdo inay dhaceysa. Halista kansarka wuxuu ka qeyb yahay nolosha qof walba.
- Waxyaabaha kordhiyaa halista waxaa loo yaqaan xaqiiqaha halista. Waxaa jiro xaqiiqaha halis badan ee kansarka mandhaciirka.
- Xaqiiqaha halista qaar waxay kordhisaa halista kansarka mandhaciirka wax ka badan dadka kale. Xaqiiqaha halista ee saameyso waqtiyeynta baaritaanka kansarka mandhaciirka waxaa ku jiro da'da iyo caafimaadka. Halista kansarka mandhaciirka waxaa lagu kooxeeyay isku celceliska, la kordhiyay, iyo halis sareyso.
- Qaadashada aspirin iyo noolaanshaha hab nololeed caafimaadan waxay ku caawin kartaa ka hortaga kansarka mandhaciirka dheeraadka ku ah baaritaanka kansarka.

### **Kansarka maku sugayo adigana ha sugin**

Inta lagu jiro safmarka COVID-19, tirada dadka helayo baaritaanka kansarka lagu talliyays hoos ayuu u dhacay. Baaritaanada aad seegtay waxay kuu hogaamin kartaa baaritaan daahay iyo fursado kugu seego daaweynta.

Ha sugin oo ha dayicin jadwalka daryeelka caafimaadka. Ka taxadar nafsadaada adiga sameynayo baaritaanada jadwalka kansarka. Kala hadal dhaqtarkaaga goorta iyo inta jeer ee la baarayo.

Wax badan oo fariinta NCCN oo in “Kansarka Uusan ku Sugaynin Adigana Ha sugin” waxaa laga heli karaa [NCCN.org/resume-screening](https://www.nccn.org/resume-screening).

# 2

## Isku celceliska halista ee kansarka mandhaciirka

- 15 Baaritaanka wuxuu ku bilowdaa da'da 45
- 16 Waxaa jiro dooqyada baaritaanka
- 18 Shahaashada labaad waxay noqon kartaa 10 sanno
- 19 Qodobada muhiimka ah





Inta badan dadka ku jiro halista kansarka mandhaciirka wuxuu leeyahay isku celceliska halis. Isku celceliska qatarta waxay ku saleysantahay da'da iyo maqnaanshaha xaqiiqaha halis weyn.

## Baaritaanka wuxuu ku bilowdaa da'da 45

Sannooyin, dadka qabo isku celceliska halista waxay ku bilaabaan baaritaanka kansarka mandhaciirka 50 sanno jir. Laakin, kansarka mandhaciirka wuxuu ku jiraa sare u kaca dadka ka hooseeyo 50 sanno jir. Haddeer, dadka leh isku celceliska halista waxay ku bilaabaan baaritaanka 45 sanno jirka.

Halista kansarka mandhaciirka waxay ku kala duwanyihiin qowmiyad ahaan iyo jinsiyad. Mareykanka, qiimooyinka ugu sareeyo ee kansarka mandhaciirka waxay ka dhacaan shaqsiyaadka Madowga. Shaqsiyaadka Madowga

waa inay bilaabaan baaritaanka kansarka mandhaciirka oo da'da 45 ama ka horeeyo haddii kansarka mandhaciirka wuxuu ku jiraa qoyska.

Dadka qaar ee ka hooseeyo 45 sanno jir waxaa ku dhaco kansarka mandhaciirka. Qaarkood waxay leeyihiin halis korodhay ama sareyso ee kansarka mandhaciirka, laakin dadka kale ma lahan xaqiiqaha halista weyn. Kala hadal bixiyayaahaga daryeelka caafimaadka ee ku saabsan haddii ay aheyd inaad bilowdid baaritaanka kansarka ka hor da'da 45.

Dadka qabo caafimaad wanaagsan waa inay maraan baaritaanka kansarka mandhaciirka oo illaa da'da 75. Haddii aad u dhaxeysid 76 iyo 85 sanno jir, baaritaanka kansarka waa go'aanka shaqsiga ee la gaarayo kadib markii aad la hadashid bixiyaha daryeelkaaga caafimaad. Wax ka weydii faa'idada iyo qasaaraha baaritaanka ee iftiinka caafimaadkaaga. Baaritaanka kansarka mandhaciirka looma baahno haddii aad ka weyntahay 85 sanno jir.

**Da'aha  
45 illaa 75**

**Hel baaritaan  
(illaamaa aadka  
leedahay jirada  
halista geliso  
noloshu).**

**Da'aha  
76 illaa 85**

**Baaritaanka waa  
go'aan shaqsiyeed.  
Baro waxa ay  
kuu tahay adiga  
faa'idada iyo  
qasaaraha.**

**Da'aha  
86 iyo ka  
weyn**

**Baaritaanka  
looma baahno.**

## Waxaa jiro dooqyada baaritaanka

Dadka qabo isku celceliska halista ee kansarka mandhaciirka waxay leeyihiin dooqyada baaritaanka oo dhoor ah. Baaritaanka ugu wanaagsan waa midka aad sameysid. Baaritaan walba wuxuu ka wanaagsanyahay baaritaan la'aan. Weydii dhaqtarkaaga wax ku saabsan faa'idada iyo qasaaraha dooqa baaritaan walba.

### Baaritaanka muuqaalka


Baaritaanka muuqaalka wuxuu isticmaalaa aaladaha caafimaadka ee u ogolaado dhaqaatiirta inay arkaan gudaha jirkaaga. Waxaa ku jiro sheybaarka mandhaciirka, sheybaarka futada dabacsan, iyo raajada kumbuyuutarka (CT) sawirka mandhaciirka. Raajada mandhaciirka waa loo baahanyahay haddii ay jiraan natiijooyin aan caadi aheyn iyo sheybaarka futada ama CT sawirka raajada.

Baaritaanka muuqaalka wuxuu u baahanyahay in saxara hayntaada laga nadiifiyo saxarada. Diyaarinta saxarada waxay ka koobantahay cunto biyo ah iyo jilciye xoogan. Raac tilmaamaha diyaargarowga dhaqtarkaaga baaritaanka ka hor. Haddii saxaradaada aysan si cad ugu filneyn, dib ayaad u balansan kartaa, ku celin kartaa baaritaanka, ama samey baaritaan ka duwan.

Muuno baarida waa nidaam ka saaro muunooyinka unugyada oo baaritaan dheeraad ah. Qaliinka ka saarida burada waa nooca muunada ee soo saarto burooyinka oo dhan (ku kora darbiga saxarada gudaha). Muuno baarida waxaa la sameyn karaa kaliya inta lagu jiro sheybaarka mandhaciirka iyo sheybaarka futada dabacsan. Aalada jarida ayaa laga geliyaa dhinaca dhammaadka sheybaarka caloosha si uga soo saaraan unugyada. Inta badan burooyinka waxaa looga soo saari karaa sheybaarka caloosha. Marmar ah, qaliinka waa loo baahanyahay.

### Sheybaarka mandhaciirka

Sheybaarka mandhaciirka waa nidaam u ogolaado dhaqaatiirta inay arkaan gudaha saxarada. Waa lagu suuxinayaa inta lagu jiro nidaamka. Dhaqtarka wuxuu adeegsanayaa aalad gacanta lagu haysto ee loo yaqaan sheybaarka caloosha. Sheybaarada caloosha ee loo naqshadeeyay sheybaarka mandhaciirka waxaa loo yaqaan sida sheybaarada mandhaciirka. Kaliya tuubada duuban, qaabeysan qeyb qalabka ah waxaa la geliyaa futada, oo malawadka kore, iyo mandhaciirka. Aalada waxay leedahay iftiin, kaamirad, iyo aalada jarida.



## Dooqyada baaritaanka oo isku celceliska halista



### Baaritaanka muuqaalka

### Faa'iooyinka

### Qasaaraha

#### Sheybaarka mandhaciirka

Baaritaanka mandhaciirka iyo malawadka iyo aalada dhuuban oo si tartiib ah loo geliyo futada

- Baaritaanka halka-tallaabo— ma jiraan baaritaan dheeraad ah oo loo baahanyahay
- Hakadyo aad u dheer oo u dhaxeeyo baaritaanada haddii natiijooyinka ay caadi tahay

- Diyaarinta saxarada waa loo baahanyahay
- Lagu dhameystiro meel ka baxsan guriga
- Suuxdin ayaa la adeegsadaa
- Halis yar oo dhiig bax ah, caabuq, iyo dhaawac

#### Sheybaarka futada dabacsan

Baaritaanka qeybta ugu dambeyso ee mandhaciirka iyo aalada dhuuban oo si tartiib ah loo geliyo futada

- Hakadyo dheer oo u dhaxeeyo baaritaanada haddii natiijooyinka ay caadi tahay
- Suuxdinta looma baahno

- Diyaarinta saxarada waa loo baahanyahay
- Lagu dhameystiro meel ka baxsan guriga
- Ma qiimeyso mandhaciirka oo dhan
- Sheybaarka mandhaciirka ayaa loo baahanyahay haddii laga helo burooyin

#### Sawirka mandhaciirka CT Raajada mandhaciirka

- Hakadyo dheer oo u dhaxeeyo baaritaanada haddii natiijooyinka ay caadi tahay
- Suuxdinta looma baahno

- Diyaarinta saxarada waa loo baahanyahay
- Lagu dhameystiro meel ka baxsan guriga
- Waxaa dhaafi karo burooyinka simman
- Dib u baar ama sheybaarka mandhaciirka waa loo baahanyahay haddii burooyin laga helo

### Baaritaanka saxarada ku saleysan

#### Baaritaanka saxarada bata ee DNA-ga ku saleysan (mt-sDNA)

Baaritaanka sheybaarka oo raadiyaa calaameeyayaalka hiddaha ee kansarka saxarada ku jiro

- Saxarada adiga ayaa guriga ku qaado
- Ma jiraan diyaarin loo baahanyahay
- Ma jiraan halisaha jirka

- Sheybaarka mandhaciirka ayaa loo baahanyahay haddii natiijooyinka aysan caadi aheyn
- Uma saxsano sida baaritaanada muuqaalka
- Baaritaanada joogtada ah xittaa haddii natiijooyinka ay caadi yihiin

#### Baaritaanka ku saleysan-guaiaac ee xasaasiga sareeyo iyo baaritaanka saxarada difaaca jirka (FIT)

Baaritaanka sheybaarka raadiyo cadad yar oo dhiiga ku jiro saxaro

### Baaritaanka saxarada ku saleysan

Baaritaanka saxarada ku saleysan wuxuu u sahlanyahay inuu yeesho badelkii baaritaanada muuqaalka. Guriga, waxaad ku qaadeysaa muunada saxaradaada weel. Waxaad kadib ku soo direysaa muunada sheybaarka oo baaritaan ah. Baaritaanada saxarada waxaa ku jiro baaritaanka dhiiga saxarada (FIT), baaritaanka dhiiga muunooyinka saxarada, iyo baaritaanka saxarada DNA bato (mt-sDNA).

Inkastoo ay sahlantahay, baaritaanada saxarada ma ahan si wanaagsan sida baaritaanada muuqaalka ee lagu raadinayo burooyinka noqda kansar. Intaas waxaa dheer, baaritaanka waa nidaam labo tallaabo ah haddii natiijooyinka baaritaanka saxarada aan caadi aheyn. Tallaabada labaad waa helida sheybaarka mandhaciirka oo 6 illaa 10 bilood gudahood ee baaritaanka saxarada. Ma jiraan baaritaan dheeraad ah oo loo baahanyahay haddii natiijooyinka sheybaarka mandhaciirka kadib FIT ama mt-sDNA waa caadi.

### Shahaashada labaad waxay noqon kartaa 10 sanno

Markii natiijooyinka aad baareysid ay caadi tahay, baaritaanka xiggo waxaa lala sameyn karaa qaab walboo baaritaan. Waqtiga hakadka u dhaxeeyo baaritaanada wuxuu ku kala duwantahay sida ku saleysan qaabka baaritaanka hore. **Fiiri Hagida 2** oo hakadyada baaritaanka isku celceliska halista ah.

Dib u baarista sheybaarka mandhaciirka wuxuu leeyahay hakadka ugu dheer oo 10 sanno ah. Dib ugu baarista sheybaarka futada dabacsan waxaa lagu sameyn karaa 10 sanno haddii aad sameysid baaritaanka saxarada FIT sannad walba.

Hakadka baaritaanka muuqaalka kadib waxaa lagu sixi karaa sida ku saleysan tayada baaritaanka hore. Hakadka 1-ka sanno ah ayaa loo baahan karaa haddii saxaradaada aysan si ku fillan u dhammaan ama nidaamka aan la dhameystirin.

## Hagaha 2. Dib u baarista ku saleysan halista caadi ah



Dooqyada baaritaanka



Waqtiga illaa dib loo baaro haddii natiijooyinka hore ay caadi yihiin

Sheybaarka mandhaciirka	Dib u baarista oo 10 sanno gudahood
Sheybaarka futada dabacsan	Dib ugu baar 5 illaa 10 sanno
Sawirka mandhaciirka CT	Dib u baarista oo 5 sanno gudahood
Baaritaanka saxarada bata ee DNA-ga ku saleysan	Dib u baarista oo 3 sanno gudahood
Baaritaanka ku saleysan-guaiac ee xasaasiga sareeyo	Dib u baarista 1 sanno gudahood
Baaritaanka saxarada difaaca jirka	Dib u baarista 1 sanno gudahood

Haddii aad heshid burooyinka kansarka hore ama kansarka mandhaciirka, aqri Sadarka 4 si aad wax uga baratid tallaabooyinka xiggo.

## Qodobada muhiimka ah

- Dadka qabo isku celceliska halista kansarka mandhaciirka waxay ku bilaabaan baaritaanka 45 sanno jir. Waa inaadan yeelan xaqiiqaha halis walboo weyn.



### **Waxaan rabnaa jawaab celintaada!**

Yoolkeena waa bixinta warbixin waxtar oo sahlan in lagu fahmo kansarka.

Qaado sahankeena si aad noo ogeysiisid waxa aan si sax ah u sameyno iyo waxa aan si wanaagsan u sameyn karno:

[NCCN.org/patients/feedback](https://www.nccn.org/patients/feedback)

- Waad dooran kartaa nooca baaritaanka aad qaadaneysid.
- Baaritaanka tijaabada ugu wanaagsan waa midka aad heshid. Ka hadal faa'idada iyo qasaaraha qaabka baaritaan walba ee bixiyayaashaada daryeelka caafimaadka si markaas aad u sameysid dooq la ogeysiiyay.
- Waqtiga illaa baaritaanka xiggo uu ka duwanyahay sida ku saleysan qaabka baaritaanka hore. Baaritaanka looma baahno 10 sanno oo kale haddii aad haysatid natiijooyin caadi ah ee sheybaarka mandhaciirka. Dib u baarista baaritaanada saxarada kadib laga bilaabo 1 illaa 3 sanno.



Kansarka mandhaciirka ayaa had iyo jeer u maleeyay sida “cudurka qof waayeel ah.” Haddeer, daraasado ayaa muujiyay in qofka dhashay 1990 ama kadib ayaa aad ugu badan in 2 illaa 4 jeer ku dhaco kansarka mandhaciirka marka la barbardhigo qofka dhashay 1950. Sababtoo ah midaan, aad ayay muhiim u tahay in la isku baaro 45 sanno jir.

– Lara, ka badbaadaha kansarka Rectal

# 3

## Taariiqda caafimaadka qoyska

- 
- 21 Taariiqda halista sareyso

---

  - 23 Taariiqda halista korodhay

---

  - 24 Qodobada muhiimka ah



Kansarka mandhaciirka kuma dhaco qoysaska badankood. Qiyaastii 1 oo 3 dii qofba ee qabo kansarka mandhaciirka waxay leeyihiin xubin qoys oo qabo sidoo kale. Taariiqda qoyska waxay sare u qaadaa halistaada, laakin micnaheeda ma ahan inaad hubtid inuu kugu dhaco kansarka mandhaciirka.

## Taariiqda halista sareyso

Qoysaska qaar, qaraabada dhiiga kala duwan waxay qabaan kansarka mandhaciirka. Markii kansarka ku dhaco da'yarta ama qaraabo badan oo kaa fog, waxaa sabab u noqon karo cudurka kansarka dhaxalka.

Cudurka kansarka dhaxalka waxaa sababo hiddaha aan caadiga aheyn oo maro hoosta laga bilaabo dhalashada illaa canuga. Waa dhif.

Daryeel bixiyahaaga caafimaadka ayaa ka shakin karo inaad qabtid cudurka kansarka dhaxalka. Haddii ay sidaas tahay, waxay kuu gudbinayaan taqasus hiddooyinka. Taqasusyadaan waxay baaraan oo qorsheeyaan maareynta ee cudurka kansarka dhaxalka.

Waxaa jiro dhoor noocyo oo cudurada kansarka dhaxalka oo geliyaa qofka halis sareyso oo kansarka mandhaciirka:

- Cudurka la iska dhaxlo waxaa sababo qaladka la dhaxlay (badelma) oo is lahaansho la'aanta sameynta hiddooyinka (MMR). Mararka qaar, Cudurka la iska dhaxlo waxaa loo yaqaan sida kansarka mandhaciirka aan burooyinka aheyn ee dhaxalka (HNPC), laakin isku mid ma ahan.
- Cudurada burada waa koox cudurada kansarka ee sababo burada mandhaciirka badan. Mida ugu caansan waa burooyinka aan kansarka aheyn (FAP).

## Ogow

### taariiqda qoyskaaga

Taariiqda qoyska waa mid ka mid ah xaqiiqaha halista ugu muhiimsan oo kansarka mandhaciirka. U diyaar garow inaad u sheegtid daryeel bixiyahaaga caafimaad warbixinta xigta:

- Nooca kansarka, haddii uu wax jiro, ka midka ah qaraabada dhiiga
- Da'dooda ee cudurada kansarka
- Da'dooda haddeer ama da'da waqtiga dhimashada
- Xaaladaha caafimaadka la dhaxlay iyo ciladaha dhalashada ee qoyskaaga




Baaritaankeyga hiddaha, oo igu aqoonsaday MSH2 badelmo (Cudurka la iska dhaxlo), waxay iga caawisay inaan go'aano gaaro oo ku saabsan daaweynta mustaqbalka iyo fahamka halista mustaqbalkeyga ee kansarada kale. Tan waxay ii ogolaatay fursada loogu firfircoonaanayo daryeelkeyga caafimaad.

– Wenora, Ka badbaadaha kansar sadex jeer

## Qaraabada dhiiga

Qaraabada dhiiga waa xubnaha qoyska oo aad wada dhalateen dhalasho ahaan. Taariiqda caafimaadka qaraabada dhiigaaga wuxuu muhiim u yahay go'aansashada halistaada kansarka mandhaciirka. Waxaad wadaagtaa qiyaastii (50%) hiddahaaga ah oo qaraabada heerka koowaad. Hal rubac (25%) oo hidahaaga waxaa lala wadaagaa qaraabada heerka labaad. Adiga iyo qaraabada heerka sadexaad waxaad waadagtaan 12.5% hidaha ah.





## Taariiqda halista korodhay

Inta badan qoysaska qabo taariiqda kansarka mandhaciirka malahan cudurka kansarka dhaxalka. Qoysaskaan, sababta kansarka ma cada. Kansarka waxaa sababi karo hidooyinka la wadaagay, waaya aragnimada la wadaagay, ama labadaba.

### Taariiqda qoyska ee kansarka mandhaciirka

Waxaad ku jirtaa halis korodhay oo kansarka mandhaciirka haddii qaraabada dhiiga uu yeeshay kansarka mandhaciirka. Sababta hiddaha waxay u badantahay haddii qaraabo badan ay qabeen kansarka mandhaciirka. Waxay sidoo kale aad ugu badantahay haddii kansarkooda uu dhacay kahor 45 sanno jir.

### Taariiqda qoyska ee burada aan kansarka aheyn

Halistaada way korodhay haddii qaraabada heerka koowaad uu qabay burada aan kansarka aheyn. Burada aan kansarka aheyn waa buro caadi ah.

Burada aan kansarka aheyn ee hore waxay leedahay hal ama ka badan oo sadexdaan aastaamo:

- Heerka sare ee unugyada isbadelo – Unugyada isbadelo waa qaabka nabarka unuga aan caadiga aheyn. Heerka sare ee unugyada isbadelo waxay ka koobantahay unugyada u dhow inay kansar noqdaan.
- Cabir balaaran – Burada aan kansarka aheyn way balaarantahay haddii ay tahay 1 sentimiitir oo cabirka ama ka balaaran.
- Daraasada unugyada tuubooyinka dhacaanka ama dhacaanka ah – Nabarka aan kansarka aheyn waa midka ugu caansan, laakin nabraha dhacaanka leh ama burooyinka tuubooyinka dhacaanka ah ayaa aad ugu dhow inay noqdaan kansar. Burooyinka afeysan ee aan kansarka aheyn (TSAs) wuxuu leeyahay qaabka nabraha dhacaanka leh.




### Qaababka nabraha ee burooyinka aan kansarka aheyn

**Burooyinka waxay leedahay qaababka 3 nabaro. Gudaha burooyinka aan tuubada aheyn, unugyada waxay leeyihiin qaab wareegsan (bidix). Burooyinka dhacaanka leh waxay leeyihiin qanjiro dheer (dhexaad ah). Tuubooyinka dhacaanka burooyinka aan kansarka aheyn waa isku darka labadaba qanjiro (midigta).**

Tuubada mandhaciirka: [https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Tubular\\_adenoma\\_2\\_intermed\\_mag.jpg](https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Tubular_adenoma_2_intermed_mag.jpg)

Villous adenoma: [https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Villous\\_adenoma1.jpg](https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Villous_adenoma1.jpg)

Tubulovillous adenoma: [https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Tubulovillous\\_adenoma.jpg](https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Tubulovillous_adenoma.jpg)



### Taariiqda qoyska ee xaalada unugyada afeysan

Halistaada way korodhay haddii qaraabada heerka koowaad uu qabay xaalada unugyada afeysan (SSP) SSP waa mid ka mid ah dhoor noocyo oo burooyinka ah oo leh ilko-afeysan (afeysan) naqshada unuga. Sida burada aan kansarka aheyn, SSPs waxay kordhiyaan halista kansarka. SSP hormarsan wuxuu leeyahay ama labadaba ee labadaan muuqaalo:

- Unugyada isbadelo – SSP ayaa yeelan karto jeebka (foci) unugyada isbadelo. Burooyinka waxaa loo yaqaan burooyinka simman iyo unugyada isbadelo (SSP-d).
- Cabir weyn – SSP wuu weynyahay haddii uu yahay 1 senti miitir oo cabirka ama ka weyn.

### Baaritaanka halista korodhay

Marka la barbardhigo baaritaanka isku celceliska halista, baaritaanka ku saleysan taariiqda qoyska ayaa inta badan bilaabay xili horeyso oo aad ayay joogto u tahay. **Fiiri Tilmaanta 3** oo baaritaanka ku saleysan taariiqda qoyska.

Jadwalkaaga baaritaanka adiga ayaa lagu xiri karaa. Haddii aysan jirin wax walaacyo ah oo 2 ama ka badan baaritaanada ka hor, waqtiga u dhaxeeyo baaritaanada waa la dheereyn karaa. Xaqiiqaha kale ee laga yaabo inay badesho baaritaanka waxaa ku jiro da'daada iyo tirada iyo da'da xubnaha qoyska ay saameysay.

Haddii aad heshid burooyinka kansarka hore ama kansarka mandhaciirka, aqri Sadarka 4 si aad wax uga baratid tallaabooyinka xiggo.

Waxaad ku caawin kartaa qoyskaaga adiga oo u sheegayo natiijooyinkaaga baaritaanka. Dhaqtarkaaga waxaa u suurto geli karto inay bixiyaan natiijooyinka baaritaanka ama warqad aad wadaagi kartid. Markii qoyskaaga ay ogyihiin taariiqdaada, waxay u gaari karaan go'aano la ogeysiiyay nafsadooda.

### Qodobada muhiimka ah

- Cudurka la iska dhaxlo waa xaalado caafimaad oo aad dhif u ah ee ku jirtaa qoysaska. Iyaga waa xaaladaha halista sareyso ee kansarka mandhaciirka.
- Baaritaanka kansarka mandhaciirka waxay inta badan bilaabatay kahor da'da 40 haddii qoyskaaga uu qabo kansarka mandhaciirka ama burooyinka kansarada hore laakin ma jiraan cudurka kansarka dhaxalka. Waxaa laga yaabaa dib u baaris oo sida ugu dhaqsaha badan ee 5 sanno jirka xittaa haddii aanan burooyin helin.
- Maadaama taariiqda qoyska ay saameysay waqtiyeynta baaritaanka kansarka, wax uga sheeg qoyskaaga natiijooyinka baaritaankaaga. Waxaa kadib u suurto galeyso inay u gaaraan go'aano la ogeysiiyay nafsadooda.

**Waxay ku  
tusiineysaa  
daryeel oo  
waxay la  
wadaagaan  
natiijooyinka  
baaritaanka  
qoyskaaga.**



## Hagaha 3. Baaritaanka ku saleysan taariiqda qoyska



Taariiqda qoyskaaga



Bilow baaritaanka sheybaarka mandhaciirka ee horaantii baraha labada jeer



Wagtiga illaa dib loo baaro haddii natiijooyinka hore ay caadi yihiin

Hal ama ka badan oo qaraabada heerkaaga koowaad wuxuu qabay kansarka mandhaciirka

Da'da 40 ama

10 sanno ka hor baaritaanka koowaad ee qaraabadaada

Dib u baar 5 sanno ee walba

Hal ama ka badan qaraabada heerka labaad iyo sadexaad waxay qabeen kansarka mandhaciirka

Da'da 45 ama

Ka hor da'da 45 haddii kansarka qaraabada lahaa bilow hore

Dib u baar 10 sanno ee walba

Hal ama ka badan oo qaraabadaada heerka koowaad waxay qabeen burooyinka aan kansarka aheyn ee hore ama xaalada unugyada afeysan

Da'da 40 ama

Isku da'da sida da'da qaraabadaada ee cudurka

Dib u baar 5 illaa 10 sanno

### Burooyinka afeysan

**Burooyinka afeysan waxay leeyihiin qaabka unuga ilkaha afeysan. Waxaa jiro 3 noocyo oo burooyinka afeysan. Burooyinka tirada xubinta way afeysantahay, iyo intooda badan waxay keenaan halista kansarka. Burooyinka simman waxay noqon karaan kansar (aad aragtid). Burooyinka afeysan ee kansarka waa dhif oo waxay noqon karaan kansar.**

Afeysan: [https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Sessile\\_serrated\\_adenoma\\_2\\_intermed\\_mag.jpg](https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Sessile_serrated_adenoma_2_intermed_mag.jpg)



# 4

## Burooyinka mandhaciirka iyo kansarka

---

27 Burooyinka kordhiyaa halista

---

29 Wakhtiga ilaa dib u baadhista

---

30 Kansarka mandhaciirka

---

32 Qodobada muhiimka ah



Burada mandhaciirka waa nabar leenka gudaha ee mandhaciirka weyn. Burooyinka la soo saaray waxaa loo dirayaa taqasuska cudurka in la daraaseeyo. Tallaabooyinka xiggo ee daryeelka waxay ku saleysantahay waxa dhaqtarkaaga uu arkay inta lagu jiro sheybaarka mandhaciirka iyo natiijooyinka taqasuska cudurka.

## Burooyinka kordhiyaa halista

Inta badan burooyinka aysan kansar noqon, laakin halista kansarka ay korodho haddii aad qabtay hal ama ka badan sadexdaan burooyin:

### Burada aan kansarka aheyn

Burada aan kansarka aheyn ayaa sidoo kale loo yaqaan burooyinka aan kansarka aheyn, burada dhexe, iyo burooyinka caadiga ah. Waa nooca ugu caadisan ee burada mandhaciirka. Waa nabarka qanjirka sida unugyada sameeyo xabta.

Qaar ka mid ah burooyinka aan kansarka aheyn waxay aad ugu badanyihiin inay noqdaan kansar badelkii dadka kale. Kuwaan waxaa loo yaqaan burooyinka aan kansarka aheyn ee “hore”. Burada aan kansarka aheyn ee hore waxay leedahay hal ama ka badan oo sadexdaan aastaamo:

- Heerka sare ee unugyada isbadelo – Heerka sare ee unugyada isbadelo waxay ka koobantahay unugyada u dhow inay kansar noqdaan.
- Cabir balaaran – Burada aan kansarka aheyn way balaarantahay haddii ay tahay 1 sentimiitir oo cabirka ama ka balaaran.
- Daraasada unugyada tuubooyinka dhacaanka ama dhecaanka leh – Burooyinka tuubooyinka dhacaanka ah waxay leedahay 3 noocyo

nabarka qaababka loo yaqaan tuubada, nabraha dhacaanka, iyo dhacaanka tuubada. Tuubada qaabka ayaa ugu caadisan, laakin nabraha dhacaanka leh ama burooyinka tuubooyinka dhacaanka ah ayaa aad ugu dhow inay noqdaan kansar.

### Burooyinka simman

